

Tilmaamaha Dakhliga ee Kaydsiga Kharashka Daryeelka Caafimaadka iyada oo loo marayo MNsure

MNsure waa suuq ay dadka Minnesota wax ka gadan karaan, isbarbar dhigi karaan iyo doorankaraan caymiska caafimaadka ee baahidooda qancinaya, waana meesha kaliya ee laga helayo kaalmo dhaqaale.

MNsure waa meesha **kaliya** ee reer Minnesota ay ka heli karaan nacfiyada hoos u dhigaya qiimaha caymiska caafimaadka, oo ay ka mid yihiin:

- Cashuur ugu celinta yaraynaya khidmadaha caymiska ee bil kasta
- Raqiisin kharash-wadaag ah si loo yareeyo kharashaadka jeebka laga bixinayo sida hor-u-bixinta (deductible) iyo qayb-bixinta

Reer Minnesota waxay sidoo kale codsan karaan Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka) oo raqiis ah ama aan kharash lahayn iyo caymiska MinnesotaCare iyada oo loo marayo MNsure.

Cashuur ugu celinta kharashka billaha ah ee caymiska ayuu koongaresku ballaariyay. U qalmida kaydsigani kuma xaddidna dakhliga qoyska sanadka 2024.



Goorta la isdiiwaangaliyo

Noofambar 1, 2023 – Janaayo 15, 2024:
Isdiiwaangelinta furan ee qorshayaasha caafimaadka gaarka ah ee 2024

La heli karo sanadka oo dhan:

- Isdiiwaangelin khaas ah (sababtoo ah dhacdooyinka nolosha oo u qalma) qorsheyaasha caafimaadka gaarka ah
- Isiiwaangelinta MinnesotaCare iyo Gargaarka Caafimaadka
- Isiiwaangelinta xubnaha qabaa'ilka Hindida Maraykanka ee federaalku aqoonsanyahay

Shaxdani waxay muujinaysaa caawimada maaliyadeed ee aad u qalmi karto iyadoo ku xiran tirada qoyska iyo dakhliga.

Dadka qoyska	Medical Assistance dadka waaweyn ee 18 kor u dhaafay*	Gargaarka Caafimaadka loogu talagalay caruurt*	Gargaarka Caafimaadka ee loogu talagalay dumarka uurka leh*	MinnesotaCare	Canshuurta aan lagugu ee 2024 ee qorshayaasha caafimaad ee gaarka ah
Dakhliga bileed/sanadeed (illaa iyo)	Dakhliga bileed/sanadeed (illaa iyo)	Dakhliga bileed/sanadeed aan ka badnayn (Xaddidadoyo dakhliyeed ee xooga ka sarreyya ayaa lagu dabbagayaa dhallaanka ka da'yar 2 sano)	Dakhliga bileed/sanadeed aan ka badnayn	Dakhliga bileed/sanadeed aan ka badnayn	Dakhliga sanadlaha ee ka sarreeyaa
1	\$1,615 / \$19,391	\$3,341 / \$40,095	does not apply	\$29,160	\$29,160
2	\$2,185 / \$26,227	\$4,519 / \$54,230	\$4,568 / \$54,821	\$39,440	\$39,440
3	\$2,755 / \$33,063	\$5,697 / \$68,365	\$5,759 / \$69,110	\$49,720	\$49,720
4	\$3,325 / \$39,900	\$6,875 / \$82,500	\$6,950 / \$83,400	\$60,000	\$60,000
5	\$3,894 / \$46,736	\$8,052 / \$96,635	\$8,140 / \$97,689	\$70,280	\$70,280
6	\$4,464 / \$53,572	\$9,230 / \$110,770	\$9,331 / \$111,978	\$80,560	\$80,560
7	\$5,034 / \$60,408	\$10,408 / \$124,905	\$10,522 / \$126,267	\$90,840	\$90,840
8	\$5,603 / \$67,244	\$11,586 / \$139,040	\$11,713 / \$140,556	\$101,120	\$101,120
Qof kasta oo dheeraad ah ku dar	\$569 / \$6,836	\$1,177 / \$14,135	\$1,190 / \$14,289	\$10,280	\$10,280

*Xadka dakhliga ee Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka) waxaa loogu talagalay caymiska ka bilaabanaya Luulyo 1, 2023, ee soconaya illaa Juun 30, 2024.

Tilmaamahan dakhligu waa kuwo qiyas ah oo loogu talagalay u isticmaalka macluumaad ahaan oo keliya. Wuxaad u baahan tahay inaad buuxiso arji si loo go'aamiyo u qalmitaankaaga dhabta ah.

Caymis Dhammaystiran

Dhammaan qorshayaasha waxaa ka mid ah nacfiyada caafimaadka ee aasaasiga ah sida daryeelka ka-hortaga iyo daawooyinka la qoro, oo laguuguma diidi karo caymis xaalado hore u jiray awgood. **Ka raadi “about the plans” (“wax ku saabsan qorshayaasha”)** **MNsure.org si aad wax badan uga ogato.**



Ikhtiyaarrada Caymiska

Qorshayaasha Caafimaadka Gaarka Loo Leeyahay

Sidoo kale loogu yeero “qualified health plans” (“qorshayaal caafimaad oo u qalma”) ama QHPs, kuwani waa qorshayaal caafimaad oo ay bixiyaan shirkado caymis. Canshuur ugu celinta ayaa la heli karaa iyadoo lagu go'aaminayo tirada qoyskaaga iyo dakhligaaga, iyo qiimaha caymiska aaggaaga. Qorshayaasha waa in la iibsado iyadoo loo marayo MNsure si loogu qalmo canshuur ugu celinta.

MinnesotaCare

Waxay caymisaa dadka reer Minnesota ee dakhligoodu hooseeyo ee aan heli karin caymiska daryeelka caafimaadka oo qiihiisa la awoodi karo ee aan u qalmin Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka).

Lacag bixinta billaha ah ee qiimaheedu hooseeyo waxaa lagu go'aamiyaa tirada qoyska iyo dakhliga.

Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka)

Barnaamijka Medicaid ee Minnesota wuxuu caymiyaa dadka dakhligoodu hooseeyo, gaar ahaan carruurta iyo haweenka uurka leh.

Ma jirto lacag bixin bille ah.

Hel Caawimada Arjiga iyo Isdiiwaangelinta oo Bilaash ah

Soo wac 651-539-2099 ama 855-366-7873 si aad u hesho caawimo luuqadaada ah ama si aad u hesho macluumaadka xiriirka hage ay MNsure-aqoonsantahay oo ku hadla afkaaga.

Hageyaal

Shaqale tababaran oo ka socda hay'adaha bulshada maxalliga ah oo bixiya caawimada arjiiga iyo isdiiwaangelin oo lacag la'an ah iyo la socoso. Hageyaal ku hadla Soomaali ayaa diyaar ah.

Dillaalada

Xirfadlayaal tababaran oo shatti haysta oo bixinaya caawimada diiwaangelinta oo bilaash ah iyo talo ku saabsan doorashada qorshe.

Xarunta Xiriirka MNsure

651-539-2099 ama 855-366-7873

Khabiiro si buuxda u tababaran ayaa diyaar u ah inay kaaga jawaabaan su'aalahaaga. Caawimada waxaa lagu heli karaa Soomaali.



MNsure.org



[/MNsure](#)



[/MNsure](#)



[/mnsureorg](#)

MNsure kuma takoorto sababta qowmiyad, midabka, asalka qaranka, caqiidada, diinta, jinsiga, da'da, naafonimada, kaalmada dadweynaha, xaaladda guurka ama jinsi doorashada.

Si aad u hesho qaababka loo fududeeyey naafanimada ee dukumeentigan, soo wac 855-366-7873.

Xasuusin. Caawimo lacag la'an ah turjumaada dukumiintigan, soo wac 855-366-7873.

IG-So 092023